

Sida Badbaadada Leh ee Daawo Loo Turro

Safe Medicine Disposal - Somali



PAED-105

10-2025

Sideen u tuuraa daawada aan la isticmaalin?

Gillette Children's waxay taageertaa in loo tuuro dawooyinka aan la isticmaalin si deegaan ahaan iyo bulsho ahaaba masuuliyad ku dheehantahay. Dib uma qaadan karno dawooyinka hadhaaga ah, laakiin waxaan bixinaa macluumaad ku saabsan sida loo tuuro dawooyinka hadhaaga ah sida ugu ammaansan ee suurtoogalka ah.

Waxaa muhiim ah INAADAN haynsanin daawo dheeri ah ka dib markaad joojiso isticmaalkooda, gaar ahaan xanuun baabi'iyaha xoogga badan (opioids) iyo walxaha la xakameeyo sida oxycodone ama diazepam. Waxaa lagugula talinayaa inaad iska tuurto xanuun baabi'iyaha xoogga badan (opioids) haddii aadan isticmaalin muddo laba toddobaad ah ka dib xanuun ba'an ama qalliin.

Barnaamijyada Tuurista Daawada

Degmooyin badan iyo hay'adaha fulinta sharciga ee maxalliga ah waxay ka qayb qaataan Maalmaha Dib U Qaadashada dawooyinka ama sanduuqyo lagu ridi karo sanadka oo dhan si ay uga caawiyaan dadka deegaanka inay si ammaan ah u tuuraan dawooyinka aan loo baahnayn.

Websaydhkan Hay'adda Fulinta Maandooriyaha (DEA) ayaa kaa caawin kara helitaanka goob dib u qaadasho oo diiwaangashan. Waxaad ka raadin kartaa goobta kuugu dhow ee aad gayn karto adoo gelinaya furaha boostada (zip code) ama magaaladaada.

Waxaa jira meel dadweynaha ka dhaxeeyso oo lagu tuuro dawooyinka oo ku yaal isla dhismaha Gillette ee St. Paul Clinic. Albaabka weyn ee dadweynaha ee Isbitaalka Regions, oo sidoo kale loo yaqaan Albaabka Koonfureed, wuxuu leeyahay santuuqa "Dib-u-Qaadashada" Dawooyinka. Sanduuqan ammarka ah wuxuu ku yaalaa dabaqa 1aad ee u dhow wiishka koonfureed. Waa diyaar sannadka oo dhan si loogu rido dawooyinka aan loo baahneyn.

Sida Badbaadada Leh ee Daawo Loo Turro

Safe Medicine Disposal - Somali



Ka waran haddii aysan jirin meel ii dhaw oo daawada la gayn karo?

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida saxda ah ee loo tuuro daawooyinka guriga ee aan la isticmaalin, booqo **bogga macluumaadka FDA**.

This information is for educational purposes only. It is not intended to replace the advice of your health care providers.
If you have any questions, talk with your doctor or others on your health care team.

If you are a Gillette patient with urgent questions or concerns, please contact Telehealth Nursing at 651-229-3890.